

K-12 Talaalada iyo Macluumaadka Caafimaadka

Gacaliyeyaal Waalidiinta iyo Ilaaliyeyasha,

Fadlan la socda in Sharciga Ohio dajiyay sharuudo la xariira talaalka iyo siinta dawooyinka marka ardayga ku sugan yahay dugsiga. Fadlan akhri kaddibna dhamaystir macluumaadka hoose.

- 1) Sharciga Ohio wuxuu rabaa in DHAMAAN ardayda qaataan inta ugu yar talaalada ku qoran dusha dambe foomkaan si ay u tagaan dugsiga. Ardayga wuxuu haystaa 14 maalin in uu soo gudbiyo warqado qoran oo ku saabsan talaalada ama haddii kale waxaa dhici karto in ardayga laga reebo dugsiga ilaa warqadahaas laga soo gudbiyo.
- 2) Ha isku haleynin in dugsigii hore soo gudbiyo diiwaanka, waalida/ilaaliyaha ayaa mas'uul ka ah in ay keenaan diiwaanka talaalka. (ORC 3313.67 iyo 3313.671)
- 3) Haddii loo baahdo in daawada la siiyo saacadaha dugsiga, fadlan waxaad foomamka loo baahan yahay ka codsataa kliinikada caafimaadka dugsiga.
- 4) Dugsiga ma qaadi karo mas'uuliyadda la xariirta daweynta cunug xanuunsan ama dhaawacan wixii ka baxsan siinta kaalmada kowaad.
- 5) Ardayda soo gasho Dugsiyada Magaalada Westerville ee ka timaada waddan shisheeye waxaa laga rabaa in baaritaankooda maqaarka T.B. ahaado negatiifo, ama in raajada-x ee lagu sameeyo U.S. ahaato nadiif, KA HOR inta aan la gaarin maalinta kowaad imaashada dugsiga.
- 6) **Macluumaadka Caafimaadka:** Fadlan calaamee DHAMAAN inta lagu dabaqi karo

Student Name				Taariikhda Diiwaan Gelinta:
Westerville School:		Gr:		Date of Birth:
Last School Attended				
<input type="checkbox"/> Xasaasiyadda Raashinka:				<input type="checkbox"/> ADD/ADHD
<input type="checkbox"/> Xasaasiyadaha Kale:				<input type="checkbox"/> Neefta
<input type="checkbox"/> Loo Baahan Yahay Epi-Pen				<input type="checkbox"/> Loo Baahan Yahay Qalabka Lagu Neefsado
<input type="checkbox"/> Dawooyinka Kale:				<input type="checkbox"/> Lama Haayo Taariikhda Caafimaadka
<input type="checkbox"/> Macluumaadka Kale:	Haddii waxyaabaha kor ku qoran quseyaan cunugaada, fadlan calaamee. Haddii aysan jirin waxba, fadlan calaamee Ma Jirto Taariikh Caafimaad.			

- 7) **Talaalada:** Fadlan dhamaystir Jadwalka Talaalka hoose ee loo baahan yahay ama **soo gudbi koobiga diiwaanka talaalka ardaygaada**

Istiomaalka xafiiska keliya:

Kaddib marka la fiiriyay, talaalada hoos lagu muujiyay waa: Kuma Jiro Faylka

Ma Dhamaystirna

Waa Socotaa Hawsha Iyo Waa La Gaaray Waqtigii Loo Baahnaa

Darajada/Qiyaasta Loo Baahan Yahay	1	2	3	4	5	6
Dusha dambe ka fiiri tafaasiisha						
K-12 DTaP, DT, Td, Tdap						
K-12 Qalal						
K-12 Cagaarshow B (HBV)						
K-12 MMR (jadeeco, qaamoo qashir, jadeecada jarmalka)						
K-11 Talaalka Waafgaabada (Busbus)			ama	Taariikhda Cudurka Busbuska:		
ama						
MMRV (isu geynta mmr/varicella)						
7-12 Xoojiyaha (Booster) Tdap						
7, 8 & 12 Tallaalka Meningitis						
Wax Kale						
Waxaa loo baahan yahay baaritaanka maqaarka TB ama raajada-x xabadka oo nadiif ah (laguna sameeyo U.S.) muujiyaan negatiifo KA HOR inta ardayda aan lagu qorin WCS marka ay ka yimadaan waddan shisheeye. Waxaa ka mid ah caruurta Xanaanada (Kindergarten) iyo kuwa Aan Gaarin Dugsiga ee ku dhashay dibadda Mareykanka.			Taariikhda La Siiyay	Taariikhda ka Akhriyay	Natiijada	Natiijada CXR

Waxaan fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay in aan diiwaanka talaalka u keeno shaqaalaha kliinikada dugsiga ugu dambayn maalinta 14^{aad} dugsiga.

8) **Signature of Parent/Guardian** _____ **Date** _____

FADLAN, KALKAALIYAHA DUGSIGA U SOO CELI FOOMKAAN AMA UGU SOO DIR FAKS AHAAN UGU DAMBAYN: _____

TALLAALADA	Tallaalka Imaanshaha Dugsiga DAYRTA 2023
DTaP/DT Tdap/Td Gawracatada, Xiiq-dheerta, Teetanada	<p>K-12 Afar ama in ka badan oo ah DTaP ama DT, ama isku-darkasta. Haddii dhammaan afarta qiyaasood la bixiyay ka hor maalinta dhalashada da'da afraad, qiyaas shanaad ayaa loo baahan yahay. Haddii qiyaasta afraad la siiyay ugu yaraan lix bilood ka dib qiyaasta saddexaad, iyo markay ahayd maalinta dhalashada da'da afraad ama kadib, markaa qiyaas shanaad looma baahna.*</p> <p>Fasalada 7-12 Hal qiyaas oo tallaalka Tdap ah waa in la siiyaa marka la joogo da'da toban sano ama ka dib. **</p>
CUDURKA DABAYSHA	<p>K-12 Saddex qiyaasood ama ka badan oo IPV ah. <i>Qiyaasta UGU DAMBAYSA waa in la qaataa maalinta dhalashada da'da afraad ama ka dib, iyada oo aan loo eegin tirada qiyaasihii hore. ***</i></p>
MMR Jadeeco, Qaamo-qashiir, Jadeeco Jarmal	<p>K-12 Laba qiyaasood oo MMR ah. Qiyaasta koowaad waa in la qaataa maalinta dhalashada sanadka koowaad ama ka dib. Qiyaasta labaad waa in la qaataa ugu yaraan 28 maalmood ka dib qiyaasta koowaad.</p>
Cagaarshowga B Cagaarshowga B	<p>K-12 Saddex qiyaasood oo cagaarshowga B ah. Qiyaasta labaad waa in la qaataa ugu yaraan 28 maalmood ka dib qiyaasta koowaad. Qiyaasta saddexaad waa in la qaataa ugu yaraan 16 toddobaad ka dib qiyaasta koowaad iyo ugu yaraan siddeed toddobaad ka dib qiyaasta labaad. Qiyaasta ugu dambeysa ee taxanaha ah (dawada saddexaad ama afraad) waa in aan la qaadan ka hor da'da 24 toddobaad.</p>
VARICELLA (Busbus)	<p>K-12 Laba qiyaasood oo tallaalka varicella ah waa in la bixiyaa ka hor inta aan la bilaabin. Qiyaasta koowaad waa in la qaataa maalinta dhalashada sanadka koowaad ama ka dib. Qiyaasta labaad waa in la qaataa ugu yaraan saddex bilood ka dib qiyaasta koowaad; si kastaba ha ahaatee, haddii qiyaasta labaad la qaato ugu yaraan 28 maalmood ka dib qiyaasta koowaad, waxaa loo arkaa mid ansax ah.</p>
MCV4 Meningococcal	<p>Fasalada 7-11 Hal qiyaas oo ah tallaalka meningococcal (serogroup A, C, W, iyo Y) waa in la qaataa markay tahay ama ka dib maalinta dhalashada da'da toban sano.</p> <p>Fasalada 12 Laba qiyaasood oo ah MCV4 halka lagu gaaro da'da 16 jir sano, oo ay u dhaxayso ugu yaraan siddeed toddobaad qiyaasaha. Haddii qiyaasta hore la qaatay maalinta dhalashada sanadka lix iyo tobnad, kaliya hal qiyaas ayaa loo baahan yahay. ****</p>

FIIRO GAAR AH:

- Tallaalka waa in lagu bixiyaa si waafaqsan nooca ugu dambeeyay ee *Jadwalka Tallaalka Carruurta iyo Qaan-gaarka ee lagu taliyay ee da'aha 18 sano ama ka yar ama jadwalka tallaalka ee dadka da'doodu tahay afar bilood - 18 sano ee ka goor dambe billaabay ama dib dhacay in ka badan hal bil*, sida ay daabacday Guddiga La-talinta ee Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada ee Hab-raacyada Tallaalka. Jadwalka ayaa la heli karaa si loo daabacdo ama laga soo dagsan kartaa www.cdc.gov/vaccines/schedules/index.html.
- Qiyaasaha tallaalka ee la bixiyay wax ka yar ama la eg afar maalmood ka hor muddada ama da'da ugu yar ee u dhaxaysa ayaa ansax ah (muddada nimcada). Qiyaasaha la bixiyay in ka badan ama la eg shan maalmood ka hor muddada ama da'da ugu yar ee u dhaxaysa ma ahan qiyaaso ansax ah waana in lagu celiyaa marka da'da ku habboon tahay. Haddii MMR iyo varicella aan la qaadan isku maalin, qiyaasaha waa in la kala fogeeyaa ugu yaraan 28 maalmood iyada oo aanay jirin waqti dib-dhac.
- Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan tixraac [Xeerka Ohio ee dib loo eegay ee 3313.67](#) iyo [3313.671](#) ee imaanshaha dugsiga iyo [Diwaanka Joornaalka Agaasimaha ODH ee tallaallada](#), looga baahan yahay xanaanada carruurta iyo dugsiga. Dukumeentiyadan waxaa ku taxan tallaallada loo baahan yahay oo lagu taliyay waxayna muujinayaan ka-dhaafitaanada tallaallada.
- Fadlan kala xiriir Waaxda Caafimaadka Ohio ee Barnaamijka Tallaalka lambarka 800-282-0546 ama 614-466-4643 waxii su'aalo ama walaac ah.

**Mudada u dhaxaysa ee lagu taliyay ee DTaP ama DT ee ardadya fasalka barbaarinta waa afar toddobaad inta u dhaxaysa qiyaasta koowaad iyo labaad, iyo qiyaasta labaad iyo saddexaad; iyo lix bilood inta u dhaxaysa qiyaasaha saddexaad iyo afraad iyo qiyaasta afraad iyo shanaad. Haddii qiyaasta shanaad la qaato ka hor maalinta dhalashada da'da afraad, qiyaas lixaad ayaa lagula talinayaa laakiin qasab ma ahan.*

*** Tdap waa la qaadan karaa iyada oo aan loo eegin inta u dhaxaysa tallaalka ugu dambeeyay ee loogu talagalay teetanada ama gowracatada. Carruurta da'doodu tahay toddobo sano ama ka weyn oo leh taariikh DTaP aan dhammaystirmayn waa in loo siiyaa Tdap sida inay tahay qiyaasta ugu horreysa ee taxanaha habsan u qaadashada. Haddii taxanuhu bilaabmay da'da toddobo ilaa sagaal sano, qiyaasta afraad waa inay noqotaa Tdap oo la siiyo da'da 11-12 sano. Haddii qiyaasta saddexaad ee Tdap lagu siiyo da'da 10 sano, looma baahna qiyaas dheeraad ah da'da 11-12 sano.*

**** Qiyaasta ugu dambeysa ee dabaysha ee taxanaha IPV waa in lagu qaataa da'da afar sano ama ka weyn oo leh ugu yaraan lix bilood inta u dhaxaysa qiyaasta ugu dambeysay iyo tii hore. Kaliya OPV trivalent (tOPV) ayaa buuxiyo shuruudaha tallaalka Mareykanka. Qiyaasaha OPV ee la bixiyay kahor Abriil 1, 2016, waa in la tirsadaa (haddii aan si gaar ah loogu xusin marka la qaadayay inta lagu jiro ololaha). Qiyaasaha OPV ee la bixiyay Abriil 1, 2016 ama ka dib, waa inaan la tirsan. Haddii isku-darka IPV iyo OPV un la qaatay, afar qiyaas oo labada tallaalka midkood ah ah ayaa loo baahan yahay.*

***** Waxaa lagu taliyay MCV4 ee ay u dhaxayso ugu yaraan siddeed toddobaad inta u dhaxaysa qiyaasaha koowaad iyo labaad. Haddii qiyaasta koowaad ee MCV4 la qaatay maalinta dhalashada lix iyo toban sano ama ka dib, qiyaas labaad looma baahna. Haddii ardaygu dhigto fasalka laba iyo tobnad oo uu jiro 15 sano ama uu ka yar yahay, hal qiyaas oo keliya ayaa loo baahan yahay. Hadda, ma jiraan shuruudo lagu galayo dugsiga ee tallaalka meningococcal B.*

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay 12/15/2022.